

## Hadda waa wakhtigii aad ilmahaaga u dalbi lahayd iskuulka

Halkaan waxaa laguugu soo diray warbixin ku wajahan waalidka leh ilmo hadda dhigta fasalkiisii ugu dameeyey ee iskuulka.

Waa inaad doorataa iskuulka aad dooneysid in ilmahaagu dhigto. Iskuulka aad doonto ee degmada ku yaal ayaad dooran kartaa. Waxaan tixgelineynaa doonitaanka hadba sida aan u awoodno. Haddii dadka dalabka sameeyey ay ka badan yihiin boosaska banaan, kolkaa waxaa la eegayaa sharciga ilmaha degan xaafada u dhow iskuulka.

Hoyga [www.orebro.se/sokaskola](http://www.orebro.se/sokaskola) waxaad ka akhrin kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan sida boosaska iskuulka loo qaybiyo. Halkaan ayaa waxaa ka heli kartaa liiska dhamaan iskuulada degmada Örebro, kuwa degmadu leedahay iyo kuwa sida gaarka ah loo leeyahay.

## Dalbo iskuulada degmada laga bilaabo 15-ka janaayo–31 janaayo

Kolkii aad go'aansatid iskuulka adiga iyo ilmahaagu aad xiiseyneysaan, kolkaas ayaad doonitaankiina ka diiwaan gelineysaa barnaamijka kombiyuuterka ee la yiraa (e-tjänst). Waxaad dooran kartaa oo aad kala hormarin kartaa ilaa shan iskuul. Dhamaan waalidiintu waxaa ay u baahan tahay boosto dhinaca internetka iyo aalad bangiga ee la yiraa (Bank-ID) si aad u gashid barnaamijka kombiyuuterka (e-tjänsten).

Dhamaan waalidiinta waxaa laga doonayaa iney saxiixaan codsiga iyadoo isticmaalaha barnaamijka (e-tjänsten) ugu damayn 31 janaayo, haddii kale codsigu ma aha mid ansax ah.

Haddii aadan isticmaali karin aalada internetka, waxaad ku dalban kartaa iskuulka foom caadi ah. Foomka waxaad kaheli kartaa hoyga <https://www.orebro.se/sokaskola> ama waxaa kasoo qaadan kartaa xafiiska adeega bulshada.

Barnaamijka codsiga lagu sameeyo ee (E-tjänsten) waxaa uu furan yahay wakhtiga **codsashada laga bilaabo 15 janaayo –31 janaayo**. Haddii aad ku dalbaneysid foomka caadiga ah, waxaa la doonayaa in codsigaagu ugu damayn soo gaaro degmada Örebro 31 -da janaayo, isagoo uu waalidku soo saxiixay. Haddii kale codsigu ansax maaha.

Ugu damayn dhamaadka bisha maarso waxaad heleysaa go'aan ku saabsan iskuulka uu ilmahaagu dhigan doono.

## Iskuulada gaarka loo leeyahay

Haddii aad dalbanaysaan iskuulada sida gaarka ah loo leeyahay , iyaga ayaad si toosa ula xiriiri kartaa. Maxaa yeelay iyaga ayaa maamula qaabka ay ardayda u qaataan. Xitaa haddii aad dalbatid iskuul gaar loo leeyahay waxaad isla markaas kaloo dalban kartaa iskuulada degmada. Haddii intaas ka dib aad dooratid inaad dhigatid iskuul gaar loo leeyahay waa muhiim inaad arrinkaas ku wargelisiid xafiiska adeega bulshada.

## Gaadiidka ilamaha u qaada iskuulka

Haddii masaafada ilmahaagu u jiro iskuulka ay tahay ilaa saddex kiilomitir, waxaa uu ilmuhu mararka qaarkood xaq u leeyahay in gaadiid u qaado iskuulka. Masaafada waxaa laga xisaabaa ciwaanka hoyga ardaygu degan yahay ilaa iskuulka degmadu ku meelaysay ardayga, xitaa haddii ardaygu doorto iskuul kale.

Waxaan kugu dhiirrigelineynaa inaad dalbatid gaadiidka ilmaha qaada , markii aad dalbanaysid iskuulka caadiga ah.Kolkaas waxaad heleysaa go'aan arrinkaas ku saabsan inta aan iskuulku bilaaban. Dalbashada gaadiidka ilamaha iskuulka u qaada waxaa la sameynayaa sanad dugsiyeed walba oo cusub.

## Hoyga ardaygu tago iskuulka ka dib

Haddii ilmahaagu boos uga baahan yahay barta la tago wakhtiga iskuulka ka dib ( fritidshem) , waxaad samayneysaa dalab gaar ah oo arrinkaas quseeyo, markii aad hesho go'aanka ku saabsan iskuulka ilmahaagu dhigana

## Halkaan wax badan ayaad ka ogaan kartaa

Hoyga [www.orebro.se/sokaskola](http://www.orebro.se/sokaskola) waxaad ka akhrisan kartaa warbixin ku saabsan sida aad iskuul u dalban kartid .Waxaad kaloo ka heli kartaa warbixin ku saabsan baabuurta caruurta iskuulka u qaada iyo hoyga caruurta tagaan iskuulka ka dib.

Waxaad kaloo la xiriiri kartaa xafiiska adeega bulshada, 019-21 10 00, [servicecenter@orebro.se](mailto:servicecenter@orebro.se) ama [servicecenter@t-meting.se](mailto:servicecenter@t-meting.se) ( luuqada dadka dhegaha la `)

## In other languages

The information above is also available our schools in Arabic, English, Finnish, Sorani and Somali.

Contact your preschool or call the Service Centre at 019-21 10 00 ama [servicecenter@orebro.se](mailto:servicecenter@orebro.se) if you have any questions.